

GUUD AHAAN KU SAABSAN MRSA

WAA MAXAY MRSA?

Jeermiga/bakteerigaga [staphylococci] ee huruudka ah waa jeermi/bakteeri caadi ah, oo aan ku sidan karno maqaarka ama sanka. Caadi ahaan ma shaacbixin karno in ay halkaas ku sugaran yihiiin, laakin mararka qaarkood waxay sababi karaan fasas/hurgun, kuwaasoo caadi ahaan ah infeekshanada aan haliska ahayn. Xaalado aan tiro badnayn, siiba dadyoowga awooddha difaaca infeekshanada u hooseeyo, wuxuu jeermiga/bakteeriga u keeni karaa fasas/hurgun halis ah. Infeekshanada u jeermiga/bakteeriga noocaan sababa waxaa lagu daawayn kara daawada antibiotics.

Daawooyinka antibiotics qaarkood waxba kama taraan Jeermiga/bakteerigaga [staphylococci] ee huruudka ah qaarkood waxay noqdaan (kuwa adkaysi badan). Kuwaas waxaa loo yaqaanno jeermiga/bakteeriga MRSA (methicillinresistant Staphylococcus aureus). Dhibaatada noocyaha MRSA waxaa weeyaan in fasas/hurgun ay sababaan, kuwaasoo aan hab sahan daawo looga helin karin. Sidaas awgeed, waxay u baahan yihiiin in bukaanka lagu daaweyo noocyoo daawada antibiotics oo gaar ah.

WAA MAXAY SABABTA AAN ISUGU MASHQUULINNO MRSA?

Maadaama MRSA u sababi karo fasas/hurgun halis ah, siiba halis u ah dadyoowga difaacooda jirka u hooseeyo, ayaa waxaa muhim ah in faafintiisa laga hortago, siiba kuwa bay'adaha sida isbitaallada iyo goobaha daryeel-caafimaadeedka. Maxeeyaalay, waxaa goobaas ku sugaran dadyoow u cudurkeenaha wax yeeli karo. Sidaas darteed, waa in aan ku dadaalna sidii aan ugu badbaadin lahayn.

SIDEE BAA MRSA LAYS QAADSIYYA?

Sida MRSA lays qaadsiyyo ee ugu badan, waa iyadoo sideha cudurkeenaha iyo qofka fayoow is taabtaan. Siiba dadyoowga mar kasta ku sugaran goob isku dhow, sida qoysaska laakin xitaa markii hawl laga qabanaayo dharka iyo firaashyada sariirta. Jeermiga/bakteeriga wuxuu muddo dheer ku noolan kara boor engegan.

YAA U BAAHAN IN UU ISKA BAARO MRSA?

Qofka la qaadsiiyay MRSA, ama ka shaqayn doono isbitaal ama goobaha daryeel-caafimaadeedka ku yaalaan dalka Norway ama goob isbitaal bukaan-socod ahaan lagu daryeeli doono, waa in u MRSA iska baara.

Dadyoowga dhaqa xayawaanada guriga, siiba xayawaanka khansiirka, waa in ay MRSA iska baaraan, waddii la qaad siiyay MRSA.

DADYOOWGA MRSA LAGA HELAY

HADDII AAN JIRKAYGA KU SIDO MRSA MAXAA IGU DHICI DOONO?

Haddii lagu wargeliyo in uu MRSA kugu dhacay, macneheedu waxaa weeyaan in jeermiga/bakteeriga MRSA aad jirkaaga ku sido, laakin weli kuma aadan xannuunsanin. Inkastoo aadan weli ku xannuunsan haddana waxaad awooda in qof kale aad cudurkeenaha qaadsiiso.

Haddii aad ka shakisantahay ama aad ogtahay inaad jirkaaga MRSA ku sido, oona ku talojirto in bukaan-socod ama booqade ahaan booqato goobaha daryeel-caafimaadeedka, waa in shaqaalaha aad wargelisa inaad jirkaaga ku sido MRSA. Taasoo shaqaalaha uu suuragelin doonto in ay ku dhaqaqaan hawlgallo ay ku badbaadinayaan bukaan-socodyada halis u ah cudurkeenha.

HADDII AAN AHAY SIDAHA MRSA MA SHAQAYSAN KARA?

Haa, waa haddii aadan ka shaqayn goobaha daryeel-caafimaadeedka (goobaha daryeel-caafimaadeedka ama isbitaal) ama aad dhaqi doonto xayawaanada guriga. Waa inaad tixgelisa qdobada ka digtoonanshada lagula taliyay. Ilmaha dugsi way dhigan karaan waana lagu xannaanayn karaa goobaha xannaanadda. Maamulka dugsiga, xannaanadda ama shaqobixiyeha (ka reeban isbitaal/goobaha daryeel-caafimaadeedka/ kuwa dhaqa xayawaanada guriga) uma baahna in ay ogadaan inaad MRSA jirkaaga ku sido.

Dadyoowga la qaadsiiyay MRSA, waxay wadajir yeelan karaan xiriir bulshodeed.

HADDII CUDUR-KEENAHA LAY QAAD SIIYO SIDEWAX YEELAA?

Haddii MRSA lagu qaadsiyyo la xiriir takhtarkaaga. Waxaa dhici karto in jeermiga/bakteeriga iskooda u ciribtirmaan, badi ahaan looma baahna in tallaabo laga qaado. Laakin haddii aad daryeesho dad xannuunsan ama dhaqdo xayawaanka khansiir, waa in lagu daaweyya oo laga ciribtira jeermiga/bakteeriga (ka aqriso warqadda goonida ah).

Haddii aad jirkaaga ku sido MRSA oona lagugu daryeelo isbitaal, waa in lagugu cidleeya qol gooni adiga ku ah. Haddii aan lagamaarmin laguma oggola inaad waaxda dhedheda ku socsocoto. Markii shaqaalaha ay shaqo ka qabanayaay waxay gashanayaan dhar, gacmogle iyo ilaaliyeha afka oo huruud ah. Waa lagu soo booqan kara, laakin waa in kahor intii aynan qolka ka bixin ay sii fiican gacmaha isaga dhaqaan.

HADDII AAN SIDE AHAY, IN XUBNAHA QOYSKAYGA MRSA LAGA BAARO MIYAA?

Haddii qofka aad la nooshahay, u ka shaqeeyo goobaha daryeel-caafimaadeedka ama u dhaqo xayawaanada guriga ama lagu daryeeli doono isbitaal / goob daryeel-caafimaadeedka, xaaladaas waa in laga baara MRSA. Haddii daawaynta aad dhamaysato, waxaa lagula talinayaan inaad la noolato qofka cudurkeenaha laga baaray. Haddii qof iyaga kamid ah uu MRSA qabo, waxaa dhici karto in mar labaad lagu qaadsiyo. Sidaas awgeed,

waa in dhammaan xubnaha qoysa oo jirkooda jeermiga/bakteeriga ku sida isku mar laga wada daaweeya.

SIDEE ANIGU UGU HORTEGI KARA IN AAN DADYOW KALE CUDURKEENAHAA QAADSIIYO?

Tallaabada ugu muhimsan ee looga hortago fasasyada/hurgunada, waa iydaa lagu dadaalo nadaafad-shaqsiyedka. Dhawaacyada jirka nadiifi waxna ku dabool. Ku dadaal inaad qalabyada timaha laysaga xiiro iyo shukumaanadaada usan qof kale ku isticmaalin. Sidoo kale, ka digtonoow markii aad qufacayso ama hindhisayso, ku hindhis shafqashaada, siiba haddii MRSA u dhuunta ka galo.

KU SAABSAN SHAYBAARYADA

Qof takhtar ama kalkaaliso ah ayaa qori yar oo suuf leh ku soo qaadayso shaybaarka. Waxaa lagu xogga sanka, qoorta iyo gumaarka iyo meelaha boogta ah. Jawaabta shaybaarka waxaa la hela dhawr maalmood kaddib. Haddii isbitaal aad ku jirto waa in muddada jawaabta la sugaayo lagu cidleeya.

KU SAABSAN DAAWAYNTA

Daawaynta waxay ku salaysan tahay in jeermiga/bakteeriga MRSA laga ciribtiro jirka. Qaabka daawaynta loogu dhaqaaqi doono waxaa go'aan ka gaari doono takhtarkaaga. Qaabka ugu caadiyeeysan waxaa weeyaan in jirka iyo timaha lagu dhaqo daawada jeermi-tirtirada ah, dkaddib boomaato ka sameeysan daawada antibiotics lana mariyo sanka, maadaama jeermiyada/bakteeriyyada caadi ahaan ay halkaas ku sugaran yihii. Tan kale, waa in firaashyada sariirta iyo dhar nadiif maalin kasta la gashada, kuwa wasakhda ah (lagu dhaqa 60 darajo).

Haddii jeermiga/bakteeriga dhuunta laga helo, waxaad subaxdii iyo habeenkii ku luqluqan doontaa daawo lagula dagaalammo jeermiyada/bakteeriyyada. Daawaynta waxay qaadanaysa 5–10 maalmood.

Daawaynta kaddib waxaa hal, laba iyo saddex toddobaad kaddib la hubsan doonaa in jeermiyadii/bakteeriyyadii ay ciribtirmeen. Tan kale, waxaa lagula talinayaan inaad shaybaar laga qaado saddex, lex iyo laba iyo tobban kaddib. Mararka qaarkood waxaa dhici karto in sida loo ciribtiro jeermiga/bakteeriga awgeed lagu celceliyo daawaynta dhawr jeer.

WARBIXIN DHEERAAD KA AQRISO

Machadka caafimaadka dadwaynaha: <http://www.fhi.no>

Mattilsynet: [Informasjon om testing for MRSA av personer i kontakt med svinebesetninger, juli 2015.pdf](#)

warbixin ku saabsan shaybaarka MRSA dadyoowga dhaqda khansiir, Iuulyo 2015.pdf